

DOKUMANTI QORAALKA KOWAAD

CABASHOYINKA KU SAABSAN BOOLIISKA – SU’AALAHA BADANAA LAYS-WEYDIYO

BULSHOYINKA DHAQAN AHANAAN IYO LUQAD AHAAN KALA-DUWAN

Boliisnimadu waa u muhiim si loo ilaaliyo shuruucda Western Australia. Dhowrista ammaanka iyo kala-dambaynta dadweynaha waa kaalinta kowaad ee Boliiska WA waxaana muhiim ah inaad ku dhaqanto awaamirta ay bixiyaan saraakiisha boliiska. Boliiska WA waxaa looga baahan yahay inay ku dhaqmaan sharciga, qorsheyaasha iyo habraactyada iyo in dhammaan saraakiishu ay masuul ka noqdaan falalkooda.

Su'aalaha soo socda badanaa lays-weydiyo ayaa loo diyaariyey macluumaadkaaga ahaan.

1. Boliiska ma ka caban karaa?
 - a. *Haa. Boliiska Western Australia waa inay ku shaqeeyaan dowyada ku qoran Xeerka Asluubta iyo Qiyamka Caddaymaha. Haddii aad rumaysan tahay in Sarkaal Boliis ah ama xubin shaqaalaha Boliiska ah inay u dhaqantay si aan xirfad-yaqaanimo ahayn ama dambi ah, waxaad ka samayn kartaa cabasho.*
2. Maxaan ka caban karaa?
 - a. *Haddii aad la kulanto wax dhacdo ah oo aad u malaynayso in boliisku u dhaqmay qaab aan xirfad-yaqaanimo ahayn, ka-cabsiin, edeb-darro ah, musuqmaasuq ama dayacaad waajibaadkooda waxaad samayn kartaa cabasho.*
3. Haddii aan doonayo inaan sameeyo cabasho ma jiraa cidaan kala hadli karo mase loo qaadanayaa inay dhab iga tahay?
 - a. *Haa. Dhammaan cabashooyinka laga keeno Boliiska Western Australia waxaa loo qaadanayaa inay yihiin kuwo dhab ah. Waxaad la xiriiri kartaa Saldhigga Boliiska degaankaaga, Xarunta Caawimaadda Boliiska ama qaybta Cabashooyinka Boliiska si aad uga hadasho arimahan ama aad ka-warbixiso arimahan ayadoo la raacayo tilmaamaha ku qoran Baroosharka Cabshooyinka Boliiska.*
4. Cabashadayda ma loo qaadanayaa si qarsoodi ah?
 - a. *Haa, haddaad jeceshahay inaad magacaaga sheegin, markaas cabashadaada waxaa loola dhaqmayaa si qarsoodi ah.*
5. Wax xun oo ku dhacaya aniga iyo qoyskayga haddii aan sameeyo cabasho ku lid ah Boliiska?
 - a. *Maya. Boliiska waxay halkaas ujoogaan inay caawiyaan xubnaha bulshada waxaana haynaa habab aan ku ilaalino. Haddii aad cabasho samayso ma jiri doonaan falcelis ku dhacaya adiga ama xubnaha qoyskaaga oo uga imaanaya Boliiska Western Australia.*

6. Haddii Boliisku ila hadlaan, maxay yihiin su'aalaha ay i-weydiinayaan maxaase layga baahan yahay?
 - a. *Boliisku waxay ku weydiin karaan magacaaga, da'da dhalashadaada iyo halka aad ku nooshahay markaasna waxaa lagaaga baahan yahay inaad uga jawaabto. Boliisku dadka ama baabuurta way baaraan xaaladaha qaarkood, ama waxay siiyaan awaamir sida in dadka looga baahan yahay inay ka dhaqaaqaan meel gaar ah. Boliiska WA waxay awood u haystaan inay meelaha qaarkood baaraan sida guryaha ayagoo wata ama aan wadan waaran xaaladaha qaarkood.*

7. Haddii aan rumaysanahay in si qaldan la ii-siiyey Ogaysiinta Jebinta Socodka-Gaadiidka, ama aan doonayo inaan la taxadiyo Ogaysiinta Jebinta Socodka-Gaadiidka, maxaan samayn karaa?
 - a. *Waxaad codsan kartaa in dib loo eego ogaysiinta ama arinta in lagu galo qaalgiga maxkamadda hortiisa haddii aad ku dacwiso inaad dambigaas gelin. Waxaa jiri doona macluumaad la xiriira labadan dariiqo oo ku saabsan Ogaysiinta Jebinta.*

8. Boliisku ma ii-qabanayaan turjumaan haddii aan u baahdo?
 - a. *Haa, Boliiska WA wuxuu keenayaa turjumaan madaxbannaan markii ay jiraan xaaladaha loo baahdo.*

9. Maxaa dhacay markaan cabasho u keeno Boliiska?
 - a. *Cabasho kasta oo ay helaan Boliiska WA waa la qiimeeyaa waxaana loo qoondeeyaa qayb si wax looga qabto iyo baaris haddii loo baahdo. Waxaa kula soo xiriiri doona Boliiska WA ayadoo qayb wax-qabasho ka ah cabashadaada. Boliisku waxay dooni karaan inay kula hadlaan iyo wixii markhaatiyo ah si loo caddeeyo dacwadaada.*

10. Maxaa dhacaya haddii aan si ula kac ah Boliiska uga sameeyo cabasho beena?
 - a. *Wixii cabasho been ah oo aad soo sheegto waxaa baari doona Boliiska WA ayadoo ciqaabaha lagugu qaadayo haddii ay jiraan caddaymo la hayo.*